Ref:MMD/0026/23 Date: 21/10/2023

# WAR MURTIYEED

**Kulan degdeg ah oo Madasha Midnimada Direed ee (MMD) ay ku qabtay magaalada Muqdisho maanta oo sabti ah bishuna tahay 21 October 2023, kulan kaasi oo looga arinsanayay xiisadda ka aloosan Gobolka Sool ee Somaliland ayaa waxaa ka soo baxay qodobadan hoos ku xusan: -**

1. **Madasha Midnimada Direed ee (MMD) waxay ugu horayn si buuxda u canbaaraynasaa bayaan "Ceebeedkii" ka soo baxay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Faderaalka Soomaaliya ee ku taariikaysnaa 19 October 2023.**
2. **Madasha Midnimada Direed ee (MMD) waxa ay ugu baaqaysaa dhammaan siyaasiyiinta iyo shaqsiyaadka ku metala Beelweynta Direed Xukuumadda Fedaraalka ee Soomaaliya in ay mowqif cad ka qaataan fal ceebeedkan oo ay muujiyaan dadnimadooda.**
3. **Madasha Midnimada Direed ee (MMD) waxay sidoo kale ugu baaqaysaa Ummadda Direed ee ku dhaqan Dalalka Somaliland, Soomaaliya, Jabuuti, Itoobiya, Kenya iyo dhammaan qurba-joogta, kulamo wada tashi**

oo degdeg kuwaas oo looga arrinsanayo arrimaha masiiriga ah ee Direed oo ay kow ka tahay qaddiyadda Gobolka Sool ee Somaliland.

4. **Madasha MMD ayaa ugu baaqaysa dhammaan madax dhaqameedka, wax-garadka, siyaasiyiinta iyo aqoonyahanka Direed in maskax, muruq iyo maalba lagu taageero dadaalada ay waddo Xukuumadda Somaliland ee ku aadan xasilinta amaanka iyo ilaalinta xuduudda dalka.**
5. **Ugu danbeyn Madasha MMD ayaa ugu baaqaysa madax dhaqameedka iyo aqoonyahanka Direed in la dardar geliyo qabashada Shirweynaha 3aad ee Direed.**

**Wabillaahi tawfiiq**

+252 63 6564241
+25377808022
mmd.info@gmail.com
faatih2018@gmail.com
Makka Al-Mukarama,
Mogadishu-Somalia